Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda JSL

Ministry of Information and Communication Technology

# Xeer-nidaamiyaha Diiwaangelinta SIM-Card-ka Macmiilka

## Xeer-nidaamiye Lr.01/2024

## ARAAR

## Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda JSL

| | |
|---|---|
| **Markaan Arkay:** | Qodobka 3-aad faqradihiisa 3-aad, 10-aad iyo 12-aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaashsiinta Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr, 50/2020; |
| **Markaan Arkay:** | Kobaca iyo Horumarka baaxadda leh ee Isgaadhsiinta Casriga ah oo ay hormood u yihiin Shirkaddaha Isgaadhsiinta dalku; |
| **Markaan Arkay:** | Waajibaadka Wasaaraddu Qaranka u hayso masuulkana uga tahay oo ah mid balaadhan una baahan in loo fuliyo si haboon; |
| **Markaan Tixgaliyay:** | Muhiimadda ay u leedahay diiwaangelinta Xogta macmiilku shirkadaha isgaadhsiinta; |
| **Markaan Tixgaliyay:** | Baahida loo qabo in la helo Xeer-nidaamiye si haboon oo tafatiran u faahfaahiya qaabka Diiwaangelinta SIM-Card-ka Macmiilka; |
| **Sidaa Daraaddeed;** | Waxaan halkan ku soo saaray Xeer-Nidaamiyaha Diiwaangelinta SIM-Card-ka Macmiilka, Xeer Lr. 01/2024 oo ka kooban qodobadan soo socda: |

**Dr. Axmed Yusuf Idris**

**Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta & Tiknoolajiyadda JSL**

# Tusmo


**CUTUBKA 1-AAD:**

**QODOBO GUUD**

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 1-aad** | Magaca Xeer-Nidaamiyaha | 5 |
| **Qodobka 2-aad** | Erey Bixin | 5 |
| **Qodobka 3-aad** | Xadka Dabaqaadda Xeer- Nidaamiyaha | 7 |
| **Qodobka 4-aad** | Ujeedooyinka Xeer-Nidaamiyaha | 7 |

**CUTUBKA 2-AAD:**

**DIIWAANGELINTA SIM-CARD-KA**

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 5-aad** | Awoodda Diiwaangelinta | 8 |
| **Qodobka 6-aad** | Waajibaadka Diiwaangeliyaha SIM-Card-ka | 8 |
| **Qodobka 7-aad** | Nidaamka Diiwaangelinta SIM-Card-ka | 9 |
| **Qodobka 8-aad** | Qaadashada SIM-Card ee Ilmaha Yar | 12 |
| **Qodobka 9-aad** | Hubinta Caddaymaha Macmiilka | 12 |
| **Qodobka 10-aad** | Tirada SIM-Card ee la Oggol-yahay | 13 |
| **Qodobka 11-aad** | Mamnuucidda Wakiilashada Is-Diiwaangelinta | 13 |

**CUTUBKA 3-AAD:**

**WAREEJINTA, HAKINTA IYO JOOJINTA SIM-CARD-KA**

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 12-aad** | Wareejinta SIM-Card-ka | 14 |
| **Qodobka 13-aad** | Hakinta Adeegsiga SIM-Card-ka | 14 |
| **Qodobka 14-aad** | Joojinta SIM-Card-ka | 15 |
| **Qodobka 15-aad** | Gudbinta Macluumaadka & Gelidda Goobaha Ruqsadlaha | 15 |
| **Qodobka 16-aad** | Ilaalinta Xogta | 16 |
| **Qodobka 17-aad** | Hubinta Sugnaanshiyaha Xogta | 16 |

**CUTUBKA 4-AAD:**

**GABAGABO**

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 18-aad** | Ganaaxa | 17 |
| **Qodobka 19-aad** | Racfaan | 17 |
| **Qodobka 20-aad** | Kaabista iyo Wax-ka-Beddelka Xeer-Nidaamiyahan | 18 |
| **Qodobka 20-aad** | Dhaqangalka Xeer-Nidaamiyahan | 18 |

# CUTUBKA 1-AAD

# QODOBO GUUD

### Qodobka 1-aad

### Magaca Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeedhayaa Xeer-nidaamiyaha Diiwaangelinta SIM-Card-ka Macmiilka Xeer Nidaamiye Lr.01/2024.

### Qodobka 2-aad

### Erey Bixin

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa erayadan soo socda waxa loola jeedaa:

1. **Adeeg Isgaadhsiineed:** Waxa loo la jeedaa adeeg kasta oo loo fidiyo macaamiisha iyada oo la adeegsanayo shebekadaha isgaadhsiinta.
2. **Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta (Telecom Traffic):** Waxa loola jeedaa xaddiga adeegyada isgaadhsiineed ee ka dhex dhaca shebekadaha isgaadhsiinta ee kala duwan.
3. **Isgaadhsiin:** Waxa loola jeedaa, lalin, diris, ama helis calaamad, biliig, xog, qoraal, maqal iyo muuqaal ah oo dhex mara shebekadaha.
4. **La Socod "Monitoring":** Waxa loo la jeedaa kormeerka dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta si loo hirgaliyo ujeedooyinka xeer-nidaamiyahan.
5. **Marin "Gateway":** Waxaa loo la jeedaa habka is-waydaarsiga xogta isgaadhsiinta la diro ama la helo iyada oo lala soconayo dhaqaqaaqyada isgaadhsiinta.
6. **Ruqsadle:** Waxa loo la jeeda shirkad la siiyay ogolaansho ay ku bixin karto adeeg isgaadhsiineed si waafaqsan Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland.
7. **SIMCARD (Subscriber Identity Module):** Waxa loola jeedaa kaadh loo adeegsado aaladaha isgaadhsiinta si loogu aqoonsado macmiilka laguna helo adeegyada isgaadhsiinta ee ay ruqsadleyaashu bixiyaan.
8. **Shebakad Isgaadhsiineed:** Waxa loo la jeedaa habka loo gudbiyo ama la isku

waydaarsado xogaha isgaadhsiinta ee kala duwan.

9. **Shirkad Isgaadhsiineed:** Waxa loo la jeeda shirkad ganacsi oo la siiyay ruqsad u ogolanaysa in ay bulshada u fidiso adeeg isgaadhsiineed.
10. **Wasaarad:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda Somaliland.
11. **Xeer:** Waxaa loola jeedaa Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland Xeer **Lr. 50/2020**.
12. **Xog Macmiil "Customer Data":** Waxa loola jeedaa caddaymaha, qoraalada iyo tilmaamaha laga soo ururiyay ama laga kaydiyay macaamiisha.
13. **Diiwaan-geliye**: waxa loola jeedaa ruqsadle isgaadhsiineed ee bixiya SIM-Card-ka macmiilka.
14. **Habka Diiwaangelinta**: waxa loo jeeda habka loo diiwaangelinayo macmiilka taas oo ah in laga helo dhamaan xogta diiwaangelinta macmiilka oo sugan
15. **Qof:** waxa loola jeedaa cid kasta oo si toos ah ama si dadban loo aqoonsan karo iyada oo la tixraacayo aqoonsiga sida magaciisa, numberkiisa, cinwaanka gurigiisa.
16. **Hay'add Garsoor**: waxa loola jeedaa maxkamadda iyo Xeer-ilaalinta Dalka.

## Qodobka 3-aad

## Xadka Dabaqaadda Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxa lagu fulinayaa ruqsadlaha bixiya adeegyo isgaadhsiineed iyada oo la tixraacayo Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland Xeer Lr.50/2020.

## Qodobka 4-aad

## Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyaha

Ujeedooyinka xeer-nidaamiyahan waxa ka mid ah:

1. In lagu nidaamiyo hannaanka diiwaangelinta SIM-Cardka macaamiisha telefoonada isgaadhsiinta dalka.
2. In lagu nidaamiyo masuuliyadaha la xidhiidha diiwaangalinta SIM-Cardka ee shirkadaha isgaadhsiinta iyo wakiiladooda.
3. In lagu nidaamiyo habka ilaalinta xogaha macaamiisha iyo habka wada shaqaynta iyo isu gudbinta xogaha macaamiisha ee wasaaradda iyo shirkadaha isgaadhsiinta.

## CUTUBKA 2-AAD

## DIIWAANGELINTA SIM-CARD-KA

### Qodobka 5-aad

### Awoodda Diiwaangalinta

1. SIM-Card-ka telefoonada ee Macaamiisha adeegyada isgaadhsiinta waxa diiwaangalin kara oo kaliya Ruqsadle isgaadhsiineed ama Wakiil heshiis la galay ruqsadle isgaadhsiineed.
2. Cidda heshiis la'aan iibgaysa, ka ganacsata ama sifo khaldan u isticamaasha SimCard-ka waxay galaysaa dambi waxana lugu ganaxayaa qadar lacageed oo aan ka yarayn **27,000,000 sl.sh.**

### Qodobka 6-aad

### Waajibaadka Diiwaangaliyaha SIM-Cardka Macmiilka

Diiwaangaliyaha SIM-Cardka Macmiilka waxa ku waajiba:

1. In uu diiwaangeliyo SIM-Cardka Macmiilka isagoo u raacaya sida ku xusan Xeer-nidaamiyahan.
2. In uu ku diiwaangeliyo qaab elektaroonik ah macluumaadka Macmiilka SIM-Cardka qaadanaya.
3. In uu xafido macluumaadka Macaamiisha SIM-Cardka, isla markaana abuuro diiwaan guud (database) oo lagu kaydiyo macluumaadkaasi.
4. In uu tirakoob ku hayo dhamaan SIM-Card-yada la iibiyay oo diiwaangashan.
5. In Macmiilka lagu diiwaangaliyo Goobta Diiwangelinta ama hab elektroonik ah.
6. In uu siiyo hay'addaha Garsoorka xiligii ay u baahdaan Xog Macmiil iyagoo raacaya hanaanka ku xusan Dastuurka Jamhuuriyadda Somalialand.

7. Hadii ay ruqsadalaha ku cadaato fulin la'anta qodabka 6-aad faqradihiisa 1-aad ilaa 7-aad waxa uu galayaa danbi, waxaanu mutaysanayaa ganax lacageed oo aan kabadnayn **76,000,000 slsh.**

## Qodobka 7-aad

## Nidaamka Diiwaangelinta SIM-Cardka

1) Haddii uu Macmiilku yahay shakhsi caadi ah oo lagu diiwaangalinayo magiciisa, waxa uu shirkadda Isgaadhsiinta u soo gudbinayaa macluumaadkan hoos ku xusan, si loogu diiwaangaliyo SIM-Card-ka:
   a) Magiciisa/ Magaceeda oo Saddexan/Afaran.
   b) Da'adiisa.
   c) Nuqulka aqoonsiga dhalashada, kaadhka codaynta doorashada, liisanka Gaadiidka ama Baasaboor.
   d) Dadka aan haysan Macluumaadka ku xusan faqrada (c) waxa si ku meel-gaadh ah lagu sii diiwangelin doonaa dammiin diiwaangashan sida; (Caaqil, Gudoomiye Degmo/Tuulo ama Ehelkiisa.
   e) Sawir (kur ah)/mid elektroonik ah.
   f) Ciwaanka Goobta uu deggan yahay.
   g) Iyo Qodbada kale ee ay shirkadu u argto lagama maarmaan
2) Haddii uu Macmiilku yahay shirkad/ hay'ad leh shaqsiyad qaanuuni ah (juristic/ legal personality) oo lagu diiwaangalinayo Magaceeda/Magaciisa SIM-Card-ka, waxa uu shirkadda Isgaadhsiinta u soo gudbinayaa macluumaadkan;
   a. Magaca Maareeyaha ama Guddoomiyaha Shirkadda/hay'adda oo Saddexan.
   b. Nuqulka Aqoonsiga Dhalashada iyo Sawir (kur ah) ee Maareeyaha ama

Guddoomiyaha Shirkadda / hay'adda.

c. Liisan ganacsi ama shahaadada diiwaangelinta shirkadda/ hay'adda.

d. Magaca iyo lambarka hay'adda ee lagu diiwaangalinayo SIM-Card-ka.

e. Ciwaanka Xafiiska Guud ee Shirkadda / hay'adda.

f. Iyo Qodbada kale ee ay shirkadu u argto lagama maarmaan

3) Haddii uu Macmiilku yahay Shaqsi Ajaanib ah, waxa uu Shirkadda Isgaadhsiinta u soo gudbinayaa macluumaadkan;

a. Magiciisa / Magaceeda oo sadexan.

b. Da'adiisa.

c. Nuqulka Baasaboorkiisa oo leh dal-ku-gal sax ah, haddii uu yahay booqasho gaaban.

d. Nuqulka Baasaboorkiisa oo leh dal-ku-gal sax ah, iyo warqadda degganaanshaha haddii uu joogayo wakhti dheer.

e. Sawir (kur ah)/mid elektroonik ah.

f. Ciwaanka uu deggan yahay.

g. Ciwaanka telefoonka qofka ugu dhaw ee laga heli karo.

h. Iyo Qodbada kale ee ay shirkadu u argto lagama maarmaan

4) Haddii uu Macmiilku yahay shaqsi Qaxoontinimo ama magan-galyodoon Dalka ku jooga, waxa uu Shirkadda Isgaadhsiinta u soo gudbinayaa macluumaadkan;

a. Magaciisa / Magaceeda oo sadexan/Afaran.

b. Da'adiisa.

c. Nuqulka Aqoonsiga ogolaanshaha Qaxoontinimada oo sax ah.

d. Sawir (kur ah)/ mid elektroonik ah.

e. Ciwaanka uu deggan yahay.

f. Ciwaanka telefoonka qofka ugu dhaw ee laga heli karo.

g. Iyo Qodbada kale ee ay shirkadu u argto lagama maarmaan

5) Haddii wax is-beddel ah ku yimaaddaan macluumaadka ku xusan faqraddaha sare ee qodobkan, waxa ku waajiba Macmiilka inuu Muddo Soddon Maalmood gudahood ah ku wargeliyo ruqsadlaha ama diiwaangaliyaha.
6) Ruqsadluhu waa inuu muddo toddoba maalmood gudahood ah wax ka-beddel ku sameeyaa macluumaadka macmiilka marka ay soo gaadho.
7) Hadii Ruqsadlahu Jabiyo faqradaha ku xusan Qodobka 7aad waxa uu galayaa danbi waxaanu mutaysanayaa ganaxa lacageed oo aan ka badnayn **76,000,000 slsh.**

## Qodobka 8-aad

## Qaadashada Caruurta ee SIM-Card

1) Haddii Macmiilku yahay ilmo yar oo da'diisu ka yar tahay 15 Jir, waxa loo baahan yahay inuu Waalidkii ama Qof ka masuul ahi la socdaa marka uu qaadanayo SIM-Card cusub.
2) Ilmaha yar ee qaadanaya SIM-Card-ka waxa laga buuxinayaa macluumaadka ku xusan qodobka 7-aad faqraddiisa 1-aad ee xeer- nidaamiyahan waxaana lagu qorayaa SIM-Card-ka magaca ilmaha, iyadoo waalidkiisa/masuulkiisa loo diiwaangelinayo tixraac.
3) Diiwaangeliyuhu waa inuu diiwaangaliyaa Magaca iyo Wakhtiga Dhalashada Ilmaha yar ee qaadanaya SIM-Card-ka, si ay u ogaysiiso marka uu gaadho 15 jir.
4) Ilmaha yar ee qaata SIM-Card marka uu gaadho 15 jir waa in uu ku diiwaangaliyaa SIM-Card-ka magaciisa Muddo Saddex Bilood gudahood ah si waafaqsan qodobka 7-aad faqraddiisa 1-aad ee Xeer-nidaamiyahan.
5) Qofka muddada ku xusan faqradda 4-aad ku diiwaangalin waaya, shirkadda Isgaadhsiintu waa in ay ka hakinaysaa adeegyada uu ka helo SIM-Card-ka.

## Qodobka 9-aad

## Hubinta caddaymaha Macmiilka

1) Diiwaangaliyuhu waa inuu hubiyaa dhammaan macluumaadka looga baahan yahay Macmiilka ee ku xusan qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan wakhtiga diiwaangalinta.
2) Diiwaangaliyuhu waa inuu ka codsadaa Macmiilka Waraaqaha assalka ah ee ku xusan qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 10-aad

## Tirada SIM-Card ee la Oggol-yahay

1. Macmiil-ku waxa uu Magaciisa ku diiwaan-gashan karaa kaliya Shan SimCard.
2. Simcard-ka Macmiilku u adeegsanayo sifo ka baxsan adeegyada Wicitaanada waxa lagu diiwaangelin karaa kaliya Laba SimCard.
3. Qofka aan Qaangaadhin waxa loo oggol yahay kaliya Hal SimCard.
4. Ruqsadluhu waa in uu hubiyaa Tirada SIM-Card-ka ee Macmiil-kasta u diiwaangashan.

## Qodobka 11-aad

## Mamnuucidda Wakiilashadda is-diiwaangelinta

1. Ciddna uma wakiilan karo Ciddkale inuu u diiwaangaliyo SIM-Card cusub.
2. Cidda u wakiilanaysa ciddkale in ay ku diiwangeliso Simcard hore waxa laga rabaa Nootaayo Sharci ah, iyo Dukumantiyo cadaynaya Wakiilashada Simcard-ka.

## CUTUBKA 3-AAD

## WAREEJINTA, HAKINTA IYO JOOJINTA SIM-CARD-KA

### Qodobka 12-aad

### Wareejinta SIM-Card-ka

1. Qof kasta oo leh SIM-Card ku diiwaangashan Magaciisa, waxa uu ku wareejin karaa lahaanshaha iyo adeegsiga SIM-Card-kaasi qof kale.
2. Qofka wareejinaya SIM-Card, waxa ku waajiba inuu qoro nootaayo sharci ah, isaga oo caddaynaya inuu hakinayo adeegsiga SIM-Card-ka, kuna wareejinayo lahaanshaha macluumaadka iyo adeegyada la xidhiidha qof kale laga bilaabo taariikhdaa.
3. Qofka geeryooda waxa lagu wareejinayaa SIM-Card-kiisa cidda leh dhaxalkiisa sharciga ah.
4. Diiwaangeliyuhu waa inuu diiwaangaliyaa qofka adeegsan doona xogta SIM-Card-ka la wareejiyay iyada oo la raacayo tallaabooyinka ku xusan Qodobka 7-aad faqraddiisa 1-aad ee xeer-nidaamiyahan.

### Qodobka 13-aad

### Hakinta Adeegsiga SIM-Card-ka

1. Ruqsadluhu waa in uu si dhakhso ah ku wargaliyaa dhamaan macaamiishiisa in la diiwaangalinayo SIM-Card-kasta, marka uu xeernidaamiyahani soo baxo.
2. Ruqsadluhu waa inuu hubiyaa in dhamaan macmiisha ay gaadhay farriinta is-diiwaangelintu.
3. Ruqsadluhu waa inuu hakiyaa SIM-Card kasta oo aan diiwaangashanayn **Hal Sano** ka dib marka uu xeer-nidaamiyahani soo baxo.
4. Wasaaraddu waxa ay sidoo kale wacyi-gelin ku baahinaysaa:

    a) Baraha Bulshadda ee kala duwan.

b) Muuq-baahiyeyaasha iyo Aaladaha kale ee casriga ah.

5. Ruqsadluhu waa inuu si dhakhsa ah dib ugu soo celiyaa adeegga macmiil kasta oo laga hakiyay marka uu is-diiwaangaliyo.

**Qodobka 14-aad**

**Joojinta SIM-Card**

1. Ruqsadluhu waxa uu joojin kara SIMCard shaqaynaya haddii:

   a) Macmiilku aanu adeegsan SIMCard-ka Muddo laba sano ah.

   b) Macmiilka leh adeegyada Wicitaanka furan (postpaid) iyo Lacag dirista (Mobile Money) oo aanu samayn dhaqdhaqaaq muddo sadex sano ah.

   c) Macmiilka codsada in laga joojiyo SIMCard-ka.

   d) La caddeeyo in macmiilku geeriyooday.

   e) La caddeeyo in macmiilku ku galay fal-dambiyeed maxkamad horteed kaga caddaatay

   f) Shirkadda ay u cadaato in diiwaangashadaha SIMCard-ku soo gudbiyay macluumaad qaldan.

2. Haddii la joojiyo SIMCard, ruqsadluhu waa inuu kaydiyaa macluumaadkii diiwaangalinta ee hore ula xidhiidhay.
3. Ruqsadluhu waa inuu saddexdii Biloodba hal mar u soo gudbiyaa Wasaaradda Macluumaadka SIMCard ee laga joojiyay adeegyadoodda.

**Qodobka 15-aad**

**Gudbinta Macluumaadka & Gelidda Goobaha Ruqsadlaha**

1. Ruqsadluhu waa inuu wasaaradda u soo gudbiyaa macluumaadka diiwaangelinta SIM-Cardka macmiilka ee diiwaangashan saddexdii biloodba hal

mar.

2. Wasaaraddu waxa ay go'aaminaysaa hannaanka la xidhiidha gudbinta macluumaadka, gelitaanka, kormeerka iyo hubinta qalabka loogu talo galay diiwaangalinta iyaga oo la socodsiinaysa ruqsadlaha si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.
3. Wasaaraddu waxa ay masuul ka tahay ka shaqaysiinta qalabka loogu talo galay diiwaangelinta si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.
4. Ruqsadlaha waxa ku waajiba in uu ku wacyi-geliyo oo uu hubiyo in shaqaalahoodu ay ilaaliyaan una hoggaansamaan nidaamka loogu talo-galay ammaanka xogta.

## Qodobka 16-aad

## Ilaalinta Xogta

1. Ruqsadlaha waxa ku waajib ah in uu ilaaliyo, xafido isla markaana ku kaydiyo meel ammaan ah xogta macaamiisha ee uu diiwaangeliyay.
2. Wasaaradda waxa ku waajib ah in ay ilaaliso, xafiddo isla markaana kaydiso xogta macamiisha diiwaangashan ee ay ka heshay ruqsadlayaasha.
3. Hawl-wadeen kasta oo ka tirsan shaqaalaha Wasaaradda iyo Ruqsadlaha oo sifo aan sharci ahayn u bixiya ama u shaaciya xogta uu ku helay shaqada uu hayo ee diiwaangalinta macaamiisha,waxaa uu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Xeerka Ciqaabta ee la xidhiidha faldambiyeedka bixinta sirta.
4. Xogta diiwaangalinta ee ku xusan qodobkan waxa lagu bixin karaa oo kaliya marka ay hay'add garsoor oo awood u lihi ogolaato, iyada oo lagala tashanayo Wasaaradda.

## Qodobka 17-aad

## Hubinta Sugnaanshiyaha Xogta

1. Wasaaradda iyo Ruqsadluhuba waa inay qaadaan Tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah sugnaanshiyaha iyo ilaalinta xogta la xidhiidha Macaamiisha.
2. Ruqsadluhu waa inuu Wasaaradda u gudbiyaa Tallaabooyinka uu qaadayo ee la xidhiidha ilaalinta xogta Macaamiisha Lixdan Maalmood gudahood marka Xeer-nidaamiyahani ku soo baxo faafinta rasmiga ah.

# CUTUBKA 4-AAD

# GABAGABO

## Qodobka 18-aad

## Ganaaxa

1. Ruqsadlaha aan ku dhaqmin Qodobada Xeer-nidaamiyahan, waxa uu mutaysanayaa ganaax, qaab waafaqsan qodobka 71-aad iyo 73-aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Xeer Lr.50/2020.
2. Ruqsadlaha soo gudbiya macluumaad qaldan, waxa uu ku dhacay fal danbiyeed, waxaana la marinayaa xeer ciqaabeedka u yaalla qaranka.

## Qodobka 19-aad

## Racfaan

1. Ruqsadlahu waxa uu xaq u leeyahay in uu racfaan ka qaato haddii uu ku qanci waayo ganaaxa Xeer-nidaamiyahani jideeyay.
2. Ruqsalaha qaadanay racfaanku waa in uu Wasaradda ku soo wargaliyaa qoraal, mudo Toban Maalmood gudahood ah oo Maalmaha shaqada ah.
3. In la soo magacaabo guddi ka kooban Labada dhinac (Wasaaradda iyo Ruqsadlaha) kuwaasi oo dib u eegaya racfaanka ruqsadlaha mudo Laba Todobaad.
4. Go'aannada ka soo baxa Guddiga hadii ruqsadlahu ku qanci waayo waxa uu cabashadiisu u gudbin doona Maxkamad awood u leh.

## Qodobka 20-aad

## Kaabista iyo Wax ka-bedelka Xeer-nidaamiyahan

1. Xeer-nidaamiyahan waxa lagu samayn karaa wax ka-beddel iyo kaabis wakhtiga loo baahdo.

2. Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda ayaa leh awoodda wax ka-beddelka iyo kaabista Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 21-aad
## Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan kama hor imanayo Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Xeerka Boosah iyo Isgaadhsinta, wuxuna si rasmi ah u dhaqan geleyaa isla maalinta uu Saxeexo Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyaddu, laguna soo saaro Faafinta rasmiga ah.

Waxa uu Xeer-Nidaamiyahan dhaqan galay **(Malinta)___________Bisha_______2024**

Dr Ahmed Yusuf Idirs

Saxeexa Wasiirka

__________________